## SUURAT MUHAMMAD:

*Magaca Eebe yaan ku bilaabaynaa ee Naxariis guud iyo mid gaaraba Naxariista.*

1. *kuwii Gaaloobay oo jidka Eebana ka leexiyay Dadka Eebe waa buriyay camalkooda.*

2. *kuwa rumeeyay xaqase oo camal fiican falay oo rumeeyay Quraanka lagu soo dajiyay (Nabiga) Muxammad ah ee xaqa ah Eebe wuu asturi xumaantoooda, xaalkoodana wuu wanaajin.*

3. *saasna waxaa ugu wacan in kuwa Gaaloobayna ay raaceen Baadhil, kuwa rumeeyayna ay raaceen xaqa Eebe, saasuuna Eebe u yeelaa tusaale.*

4. *Haddaad kula kulantaan Gaalada Dagaal Luqunta ka garaaca, markaad sugtaanna ku adkeeya xidhidda, markaas ama iska siidaaya ama haysfurteen, inta Dagaalku ka xasili, xaalku waa saas, hadduu Eebe doonana wuu ka aarsankaraa, hase yeeshee wuxuu saas u falay inuu qaarkiin qaarka kale ku imtixaano, kuwa Jidka Eebe lagu dilana Camalkooda Eebe ma hallaayo.*

5. *Eebana wuu toosin oo hanuunin kuwaas, wuuna wanaajin xaalkooda.*

6. *Wuxuuna galin Janno (uu baray) u caddeeyay.*

***Sharaxda Suurrada ( 1 )***

Gaaladii Nabiga ka Gaalowday xaqana dadka u diiday camalkoodii wuu buri, sida kuwa Nabiga rumeeya Camal fiicanna fala Dambigooda loo dhaafo, maxaa yeelay isku mid ma noqon karaan ruux xaqa raacay oo dadka faray iyo mid Gaaloobay dadkana xaqa ka reebay. Tan kale wuxuu Eebe farayaa mu'miniinta inay ku jihaadaan jidka Eebe, gaaladana isaga caabbiyaa si daran, jahaadkuna waa imtixaan Eebe, ciddii ku dhimatana waa ehlu-Janno hadii kalana waxay heli Guul iyo Sharaf, saas daraaddeed yaa ciddii Jahaadka ka tagta Dulli iyo Gumaysi uu dulfuulaa.

7. *Kuwa xaqa rumeeyow haddaad u gargaartaa Eebe (Diintiisa) isna wuu*

*idiin gargaari, Gommadihiinnana wuu sugi (Geesinnimo).*

8. *Kuwa Gaaloobayse Halaag iyo (hoos u dhac) yaa u sugnaaday, Camalkoodiina Eebe wuu halleeyay.*

9. *Saas waxaa ugu wacan inay neceen waxa Eebe soo dajiyay oo xaqa ah, markaasuu hoobiyay camalkoodii.*

10. *Miyayna ku soconin dhulka oo markaas ay arkaan siday noqotay cidhibtii kuwii Gaaloobay ee Ree Maka ka horreeyay, Ebaa halaagay, Gaaladana waxaa u sugnaaday saasoo kale halaag.*

11. *Saas waxaa ugu wacan in Eebe yahay gargaaraha Mu'miniinta, Gaaladuna ayna gargaare lahayn.*

12. *Eebe wuxuu galin Mu'miniinta Camalka fiican falay Jannooyin ay dureeri dhexdeeda Wabiyaal, kuwa Gaaloobayna way raaxaysan (Adduunka) una cuni sida xooluhu wax u cunaan, Naarna waa Gurigay ku hoyan.*

***Sharaxda Suurrada ( 2 )***

Eebe dadka gargaar ugama baahna ee imtixaan dartiis yuu u falay saas, ciddiise Diinta Eebe difaacda uu u gargaaraa, Gaaladana dulli iyo halaag yaa u dambayn, maxaa yeelay waa xaq diidayaal, waana ruuxu dhulka inuu maraa kuna waana qaato wixii dhacay, tan kale waa in mu'miniintu rumeeyaan in Eebe u gargaari hadday la yimaaddaan niyad san, midnimo, toosni iyo xaq daaficid, taasina waxay ka muuqataa siduu Eebe u gargaaray Nabigii (Naxariis iyo Nabadgalyo korkiisa Eebe ha yeelee) iyo asxaabtiisii, mudda yar ka dibna diinta islaamku meel walba ku faaftay kana talisay, intaas waxaa u dheer Jannada Aakharo, maxayse tari in sida xoolaha wax loo cuno mar hadday naaru ka dambayso.

13. *Imisay jirtay Magaalo ka xoog badan Magaaladaadan ku bixisay (Maka) aanna hallignay gargaarana aan helin.*

14. *Ruux xaqa cad ee Eebe ku sugan ma la midbaa Ruux loo qurxiyay Camalkiisa xun oo haddana waxa naftiisu jeceshahay (ee xun) raaca.*

15. *Tilmaanta Jannada loogu yaboohay mu'miniinta waa in Wabiyaal biya ah oon doorsoomaynin dhexdeeda yihiin, iyo Wabiyaal Caano ah oon*

*iyana dhadhankoodu doorsoomaynin, iyo Wabiyaal Khamro (halaal ah) oo u macaan dadka cabbi, iyo Wabiyaal Malab ah oo la sifeeyay, waxayna Jannada ku leeyihiin nooc kasta oo Midho ah, iyo dambi dhaafka Eebe. Ma la midbaa Ruux Naarta ku waari lagana waaabin Biyo kulayl daran oo Xiidmahooda gooya.*

***16. Waxaa ka mid ah Gaalada kuwo ku dhagaysan (Nabiyow), Markay agtaada ka baxaanna ku dhihi kuwa Cilmiga leh (Asxaabta) Muxuu lahaa dhawaan, kuwaasi waa kuwa Eebe daabacay Quluubtooda, waxay naftoodu jeclaydna (oo xun) raacay.***

***Sharaxda Suurrada ( 3 )***

Xooga Eebaa iska leh, xaq diide kastana Eebe wax kuma aha inuu haligo sidii kuwii horeba uu ku falay, xaq iyo baadilna isku mid ma aha, Jannada Eebe u darbay mu'miniinta ee wanaagu ku dhan yahay iyo naar daranna ma sinna, Eebeheenna dadka ma dulmiyo ruux walba wuxuu falo yuu ka abaal mariyaa samaan iyo xumaanba, Quraanka iyo xaqa oo lagu jeesjeeso waa ficilka gaalada iyo xumaanloowga ee waa in layska jiraa.

***17. Kuwa hanuunay (Eebe) wuxuu u siyaadiyaa hanuun, wuxuuna waafajiyaa (Eebe) kayaabiddiisa.***

***18. Gaaladu ma waxay sugi in Qiyaamadu kado ugu timaaddo, waxaase yimidba Calaamooyinkeedii, ee sideebay xusuus ugu sugnaan hadday Qiyaamadu timaaddo.***

***19. Ogow (kuna sugnow Nabiyow) inaan Eebe mooyeen ilaah kale jirin, una dambi dhaaf waydii naftaada iyo mu'miniinta Rag iyo Haweenba, Eebana waa ogyahay dhaqdhaqaaqiinna iyo nagaadigiinnaba.***

***20. Waxay kuwa xaqa rumeeyay dhahaan Maa la soo dejiyo Suurad, markiise la soodajiyo Suurad sugan Dagaalkana (Jahaadkana) lagu sheego waxaad arkaysaa kuwa quluubta ka buka oo ku soo fiirin (Nabiyo) sida Ruux sakaraad hayo oo kale, halaag bayna mutaan kuwaasi.***

***21. Daacadnimo iyo hadal wanaagsan yaa u khayr roonaan lahayd, markase xaalku dhaboobo (Jahaad la galo) haday Eebe u runsheegaan yaa u khayr badan.***

***Sharaxda Suurrada ( 4 )***

Ruuxii xaqa raaciddisa iyo Jidka Eebe ku dadaala Eebe wuxuu ku abaal mariyaa inuu u siyaadiyo hanuun, wuxuuna waafajiyaa wanaag iyo Eebe ka yaabid, ciddii caqli lehna waa inay waqtiga ka faa'iidaysataa, maxaa yeelay Qiyaamadu waxay ku imaan kado, markay timaadana cidna calaacal iyo catow wax uma tarto, mar haddii fursadu dhaafto, waana in Eebe si dhab ah loo qiraa laguna sugnaado arrintaas, dambi dhaafna had iyo jeer la waydiistaa, jidkiisana lagu toosnaadaa laguna jihaadaa, hadal wanaagsan, niya adag, daacadnimo iyo Eebe rumayn dhab ahna lagu dadaalo.

***22. Amaad mudantihiin haddaad xaqa (Jahaadka) ka jeedsataan inaad fasaadisaan dhulka, Qaraabadiinnana goysaan.***

***23. Kuwaasi waa kuwa Eebe lacnaday, dhagaha iyo indhahana tiray.***

***24. Miyayna Quraanka u fiirsanin (si dhab ah) mise Quluubtoodaa daboolan.***

***25. Kuwa riddoobay (gaalnimo ku noqday) inta xaqu iyo hanuunku u caddaaday ka dib shaydaanbaa u qurxiyay, yididiilo (been ahna) uguna yaboohay.***

***26. Saas waxaa ugu wacan iney kuwa riddoobay ku dheheen kuwa xaqa nacay waxaan idinku (waafaqaynaa) adeecaynaa amarka qaarkiis (colnimada Nabiga), Eebana waa ogyahay waxay qarsan.***

***27. Ee say noqon markay nafta ka qaadayso Malaa'igtu iyadoo ka garaaci Wajiga iyo gadaashaba.***

***28. Saas waxaa ugu wacan inay raaceen kuwaasi wax Eebe ka cadhoodo, neceenna raalli ahaanshihiisa, markaasuu buriyay camalkoodii.***

***Sharaxda Suurrada ( 5 )***

Xaqa iyo wanaagga iyo jihaadka oo laga jeedsado waxay sabab u noqotaa halaag iyo dhibaato, fasaadinta dhulka iyo qaraabada oo la gooyo, kuwa saa falana waa kuwa lacnadda Eebe ku dhacdo, maqal iyo aragna aan lahayn, maxaa yeelay ma aha kuwo quraanka fiiriya, arrintaasuna ciqaab adduun yay leedahay aakhira ka hor. Nabiguna (Naxariis iyo Nabadgalyo korkiisa Eebe ha yeelee) wuxuu yidhi:

“Dambi ka dhaw in Eebe ciqaabta u soo dadajiyo isagoo tii aakhirana u dheer tahay ma jiro dulmi iyo qaraaba goys.” Waxaa wariyay Imaam Axmed binu xambal. Kuwaase xaqa ka riddooba waa kuwa shaydaan ka adkaaday, xaq diidayaalna ah, Eebana kama qarsoona xaalkoodu, waana kuwa si daran nafta looga qaadi, illeen waxay raaceen wax Eebe cadha galiya wanaaggana way neceene.

***29. Kuwii Qalbiga ka bukay ma waxay u maleeyeen inaan Eebe soo muujinayn xumaata (iyo xaasadka) Qalbiga kaga jira.***

***30. Haddaan doonno waan ku tusin karnaa kuwaas, waxaadna ku aqoonsan Calaamad, waxaad kaloo ku aqoonsan hadalka leexsan, Eebana waa ogyahay camalkooda.***

***31. waannu idin imtixaanaynaa intaan ka muujinno kuwiinna Jahaadi iyo kuwa samra, waana imtixaanaynaa Xaalkiinna.***

***32. Kuwa gaaloobay ee Jidka Eebe ka leexiya dadka Rasuulkana khilaafa (lana collooba) inta xaqu u caddaaday ka dib waxba Eebe kama dhimayaan Camalkoodana wuu burrin.***

***33. Kuwa xaqa rumeeyow Eebe adeeca, Rasuulkiisana adeeca, Camalkiinnana hayska burrinina.***

***34. Kuwa gaaloobay oo Jidka Eebe ka leexiyay dadka kadibna dhinta iyagoo gaala ah Eebe uma Dambi dhaafo.***

***Sharaxda Suurrada ( 6 )***

Waxa qalbiga ku jira Eebe waa ogyahay samaan iyo xumaanba, hadduu doonana wuu muujin karaa, xaalka munaafiqiinta waxaa ka mid ah calaamooyinkooda diin iyo muslim ceeb ka sheeg iyo carrab leexsan, adduunkuna waa guri imtixaan say u kala muuqdaan runlowga, jahaadaha, samirlaha iyo kuwa xunxun, Ruuxiise gaalooba oo xaqa dadka ka reeba rasuulkana la collooba isagoo xaqu u cadyahay, muxuu Eebe u dhimi isagaa la kulmi xumaantiisee, cid xumaan fashay gaalnimana ku dhimatay (Eebaan ka magan galaynaayee) Eebe uma dambi dhaafo uma naxariisto.

***35. Ha tabar darraanina mu’miniintaay ood markaa heshiis u yeedhaan, idinkaaba ka sarreeyee Eebana idinla jiraaye, Camalkiinnaana ma***

*nusqaaminaayee.*

*36. Nolosha Adduunyo waa uun ciyaar iyo dheeldheel, haddaadse xaqa rumaysaan ood dhawrsataan wuxuu idin siin (Eebe) abaalkiinna, xoolihiinnana idin waydiisan maayo.*

*37. Hadduu idin waydiiyo (Eebe) xoolihiinna (dhammaan) idinkuna celceliyo waad bakhayloobaysaan, waxaana soobixi colnimadiinna.*

*38. Kuwaas xaqa rumeeyow waxaa laydiinku yeedhi inaad jidka Eebe wax ku bixisaan, waxaase idinka mid ah kuwo ku bakhayli, Ruuxiise bakhayla wuxuu uun kala bakhaylay Naftiisa Eebana waa hodon, idinkuna waxaad tihiin fuqaro, haddaad xaqa ka jeedsataanse wuxuu Eebe idinku baddali kuwa kale oon idin lamid noqonayn.*

***Sharaxda Suurrada ( 7 )***

Mu'miniinu waa inay xoog yeeshaan, tabaryarina ka digtoonaadaan, si ayan gaalada ugu hoos noolaanin, xaqoodana loo duudsiyin, maxaa yeelay iyagaaba Eebe la jiraa, hadday dhintaanna waa Janno hadday noolaadaanna waa guul iyo sarrayn, adduunkuna waa dhalanteed ee waa in ruuxa caqliga leh uu ku maraa wanaag iyo Eebe ka cabsi, isagoo waajibkiisana gudanaya, waa in jidka Eebana xoolaha lugu bixiyaa, bakhaylnimadana layska jiraa illeen naftaada umbay dhibiye, Eebase waa hodan dadkaase u baahan had iyo jeere, ciddiise iskibrisa oo xaqa ka jeedsata wuxuu Eebe awoodaa inuu ku baddalo mid ka khayr badan kana wanaagsan.